

Siyaasadda JICC- Habdhaqanka Ardayga ee Basaska Korkooda (1214F)

Eeg Siyaasadda [JICC-R](#) iyo [EEAEC](#), Habdhaqanka Ardayga ee Basaska Korkooda

La Muraajaceeyay 15 Oktoobar, 2009

TIXRAACYADA KALE EE LA EEGAYO.: JICC-R, Habdhaqanka Ardayga ee Basaska Korkooda

JK iyo JK-R, Anshaxa Ardayga

EEAEC, Habdhaqanka Ardayga ee Basaska Korkooda

TIXRAACA HESHIISKA.: Heshiiska ATU, Qodobka 16-Xiriirka Shaqaalaha Dugsiga Iyo Hawlwadeenka Baska

1. Kaliya ardayda iyo hawlwadeenada dugsiga ayaa si joogto ah ugu qorsheeya baska waddada gaarka ah ama dalxiiska-gaaban qaadashada ayaa la oggolaanayaa in loo raaco baska haddii oggolaansho gaar ah uu bixiyo ma' suulka dugsiga ka mas' uulka mooyaane.
2. Inta ay joogaan boosteejada baska ama goobta ka soo qaadidda, ardayda waa in ay:
 - a. U dhaqmaan hab nidaamsan
 - b. Iska ilaaliyaan qashin daadin
 - c. Ka fogaadaan waddada
 - d. Xushmeeyaan xuquuqda hantida maguurtada ah ee khaaska loo leeyahay ee ku ag-dhow
3. Ardayda waa in ay si dhakhso ah u fariistaan koraastooda kadib marka ay fuulaan baska. Wax koraas ah lama xajin karo. Haddii darawalka baska ama kaaliyihiisa u qoodeeyaan arday korsi, ardayga waa in uu u hoggaansamaa. Ardayda waxay ku nagaanayaan koraastooda inta baska uu socdo.
4. Ardayda ma furi karaan ama ma xiri karaan dariishadaha ama albaabada xaaladaha degdega ah marka laga reebo haddii uu wayddiisto in ay sidaasi ay sameeyaan darawalka baska ama kaaliyihiisa mooyaane. Ardayda waa in gacamahooda iyo madaxooga ay ku jiraan baska gudihiiisa.

5. Inta ardayda ay yihiin rakaab saaran baska, ardayda waa in aysan:

- a. Sigaar ku cabin (xeerka gobolka)
- b. Tuurin walax kasta
- c. Dhibin darawalka
- d. Qashin ku qubin
- e. Sameynin qaylo dheer ama qaylada aan loo baahnayn
- f. Ku cunin cunto ama aysan ku cabin cabbitaan
- g. Qaadin walxo halis gelin kara caafimaadka iyo badbaadada rakaabka kale

6. Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay u sheegaan darawalka baska ama kaaliyihisa wixii waxyeello ah ee gaara kuraasta ama qaybaha kale ee baska.

7. Ardayda ka baxda baska waa in aysan waligooda soconin baska gadaashiisa. Ardayda waa in ay u hoggaan samaan dhammaan xakamaynta gaadiidka socda ee loogu talagalay jid gudbidda. Haddii ardayda ay noqoto in ay gudbaan baska hortiisa, waa in ay sidaasi ku sameeyaan in u jirta ku dhowaan 10 cagood baska hortiisa ah.

8. Ardayda dugsiga dhexe iyo kuwa dugsiga sare waa in ay muujiyaan haddii laga codsado aqoonsiga habboon ee laga bixiyay dugsi kasta sida oggolaansho lagu raacayo baska ahaan.

Haddii arday kasta ku celceliyo jabinta wax ka mid ah sharciyadan, waa waajibaadka darawalka baska ama kaaliyihisa in ay soo ogeysiyaan maamulaha dugsiga ama qofka loo magacaabay.

Siyaasadda JK iyo JK-R (Anshaxa Ardayga) waa in ay xakamayso anshaxa ardayga ee la xiriira dhaqan xumada ardayda ee basaska korkooda, gawaarida degmada, ama bixiye gaadiid kasta ee ka-faa'iidayaneysa degmada.

Sharciga habdhaqanka hadda waxaa nidaamin lagu sameeyay 1993

La Muraajaceeyay 15 Oktoobar, 2009